JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب محامي العام للدولة

THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF STATE ATTORNEY GENERAL

**Sumad: XGG/415/2025** **29/11/2025**

**Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirada XFS** **Muqdisho**
**Og: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyada XFS** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha XFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci**

Xafliska Garyagaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda Summaddeedu tahay **WCAD/XAWSHH/2259/2025, ee ku taarikheysan 16/07/2025**, kana Soo baxday Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS, Ujeeddadeeduna ahayd **Soo gudbin "Xeer-nidaamiyaha Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha"**, Xeer-nidaamiyahaan oo ay Wasaaraddu ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, oo gudanaya Waajibaadkiisa ku xusan Xeer Lr.18 ee 29 Jannaayo 1976, kadib markii uu dersay xeer-nidaamiyahaan, waxa uu ku sameeyay Waafajin, Hagaajin iyo Wax-ku kordhin aan looga maarmin nidaaminta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

**Sidaa darteed**, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama uusan kahor-imaaneyn Dastuurka, Shuruucda Dalka, dhaqanka bulshada iyo Danta Guud, kana gutay Xafiisku waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa, si waafaqsan Sharciga.

**FG: halkaan waxaa ku lifaaqan Nuqulka Xeer-nidaamiyaha sare ku xusan.**

**Wabillaahi Towfiiq**

**Avv. Xuseen Xasan C/llaahi**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA ★ OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL ★ مكتب المحامي العام للدولة

AFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA
Address: State House, Villa Somalia
Tel, +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so, archive@sag.gov.so

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2259/2025** **Tr. 16/07/2025**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA DHAWRISTA XOGTA DADWEYNAHA"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa **"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Dhawrista Xogta Dadweynaha"** oo ay diyaarisay Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolojiyadda, Xukuumadda JFS.

Xeer-nidaamiyahani wuxuu qeyb weyn ka qaadanayaa nidaaminta iyo sare-u-qaadidda hannaanka dhawrista xogta dadwytnaha iyo adeegyada la xiriira.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa, inuu waajibkiisa sharci ka guto, si hab-raaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADAALADDA IYO DASTUURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTION

Mudane. Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 17/07/2025

Ha archive-ee
Ha laga sugo Wasaaradda Xog kale 17/07/2025

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda

# XEER-NIDAAMIYAHA
# SHARCIGA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

*Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknoolojiyadda, Xukuumadda JFS 2025*

## TUSMO


CUTUBKA 1AAD ........ 1

QODOBBO GUUD ........ 1

Qodobka 1aad ........ 1
Magaca Xeer-nidaamiyaha ........ 1
Qodobka 2aad ........ 1
Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyaha ........ 1
Qodobk 3aad ........ 1
Baaxadda Xeer-nidaamiyaha ........ 1

CUTUBKA 2AAD ........ 2

MABAADI'DA LAGU MAAMULAYO ADEEGSIGA XOGTA ........ 2

Qodobka 4aad ........ 2
Sharci-ahaanshaha Adeegsiga Xogta Shakhsiga ........ 2
Qodobka 5aad ........ 2
Adeegsi Dheeraad ah ee Xogta Shakhsiga ........ 2
Qodobka 6aad ........ 3
Oggolaanshaha Qofka Xogta Leh ........ 3
Qodobka 7aad ........ 4
Awood-bixinta Oggolaanshaha ........ 4
Qodobka 8aad ........ 4
Noocyada Oggolaanshaha ........ 4
Qodobka 9aad ........ 4
Adeegsiga Xogta Carruurta iyo Dadka aan Lahayn Awood Sharci ........ 4
Qodobka 10aad ........ 4
Oggolaanshaha Xog-qabteyaasha Bogagga (Cookies) ........ 4
Qodobka 11aad ........ 5
Qiimeynta Saameynta Dhowrista Xogta ........ 5
Qodobka 12aad ........ 6
Ka-noqoshada Oggolaanshaha ........ 6
Qodobka 13aad ........ 6
Ujeedka, Yareynta Iyo Saxnaanta Xogta ........ 6
Qodobka 14aad ........ 6
Muddada Keydinta Xogta ........ 6

CUTUBKA 3AAD ........ 6

NIDAAMKA U-HOGGAANSANAANTA IYO AMNIGA XOGTA ........ 6

Qodobka 15aad ........ 6
Waajibaadka Xog-dhawreyaasha Iyo Xog-adeegsadeyaasha ........ 6
Qodobka 16aad ........ 8

Sarkaalka Dhowrista Xogta .... 8
Qodobka 17aad .... 8
Diwaan-gelin .... 8
Qodobka 18aad .... 9
Khidmado .... 9
Qodobka 19aad .... 9
Rukhsadda Dhowrista Xogta .... 9
Qodobka 20aad .... 9
Kala-noqoshada Iyo Laalidda Rukhsadda .... 9
Qodobka 21aad .... 10
Daba-galka Dhawrsanaanta Xogta (Compliance audit) .... 10
Qodobka 22aad .... 10
Jabsashada Xogta .... 10
Qodobka 23aad .... 11
Wacyi-gelinta Joogtada ah ee Dadweynaha .... 11

CUTUBKA 4AAD .... 11

WAREEJINTA XOGTA .... 11

Qodobka 24aad .... 11
U-wareejin Xogta Meel Ka Baxsan Dalka .... 11
Qodobka 25aad .... 12
Wareejin Xogta Marka Aysan Jirin Ilaalin Ku Habboon .... 12

CUTUBKA 5AAD .... 12

FULIN .... 12

Qodobka 26aad .... 12
Cabashooyin .... 12
Qodobka 27aad .... 13
Baarista Cabashooyinka Iyo Jabsashada Xogta .... 13
Qodobka 28aad .... 13
MaAreeyaha Guud ee Hay'adda .... 13
Qodobka 29aad .... 14
Soo-saarista Xeer-hoosaadyo .... 14
Hay'adda Dhowrista Xogta waxay soo saraysaa Xeer-nidaamiyeyaal iyo Hab-raacyo lagu nidaaminayo mowduucyo gaar ah si loo dhaqan-geliyo Shraciga Dhowrista Xogta, waxaa xeer-nidaamiyeyaasha lagu soo saarayaa arrimaha ay ka mid ka yihiin: Dhowrista Xogta Cafimaadka, waxbarashada, Isgaarsiinta, Bankiyada iyo xogaha kale ee Hay'addu u aragto in laga soo saaro Xeer-nidaamiyeyaal gaar ah. .... 14
Qodobka 30aad .... 14
Adeegsiga Shuruucda Caalamiga Ah .... 14
Qodobka 31aad .... 14
Wax-ka-beddel Iyo Dhaqan-gal .... 14
LIFAAQA 1AAD .... 15

## CUTUBKA 1AAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "**Xeer-nidaamiyaha Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha**", waxaana lagu dhaqan-gelinayaa Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, Sharci Lr. 005 ee Maarso 20, 2023.

### Qodobka 2aad
### Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyaha

1. Ueeddooyinka guud ee Xeer-nidaamiyahan waa dhaqan-gelinta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha ee soo baxay Maarso 20, 2023, iyadoo lagu faahfaahinayo arrimaha lagama-maarmaanka u ah hab-sami-u-dhaqan-gelinta sharciga.
2. Ujeeddada guud ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, xeer-nidaamiyahan waxaa looga gol-leeyahay xaqiijinta ujeeddooyinkan soo socda:
    a. Fasiraadda qodobbada iyo mabaadi'da Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha;
    b. Xaqiijinta in xogta shakhsiga loo adeegsado si waafaqsan Dastuurka JFS iyo Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha;
    c. In lagu jideeyo hannaanka sharci iyo tilaabooyinka Dhowrista xogta dadweynaha; iyo
    d. Qeexidda waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha si loo ilaaliyo xaquuqda la xiriirta xogta shakhsiga.

### Qodobk 3aad
### Baaxadda Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan wuxuu ku kooban yahay hirgelinta xaquuqda Dastuuriga ah ee xogta shakhsiga, Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, hab-raacyada iyo xeer-nidaamiyeyaasha kale ee la xiriira Dhowrista xogta.
2. Xeer-nidamiyahan waxaa lagu dabaqayaa dhammaan Xog-dhawreyaasha, Xog-adeegsadeyaasha iyo dadka xogta leh ee ku sugan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Jabinta Xeer-nidamiyahan waxay la mid tahay iyadoo lagu xad-gudbay Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
4. Xeer-nidaamiyahan laguma dabaqayo:
    a. Cidda xogta leh oo aanan ahayn bani'aadam;
    b. Xogaha loo qaado ujeeddooyinka ah Madadaalo, Guri/qoyska, xogta lagama maarkaamka u ah Bilaabidda, Dhaqan- gelinta iyo Difaaca dacwadda sharciga ee maxkamadda horteeda, hab-raaca ay soo saarto hay'ad maamul, hababka xallinta khilaafaadka ee ka baxsan maxkamadda, Saxaafad, Waxbarasho, farshaxan ama suugaan iyo Hay`adaha dawliga ah ee ka shaqeeya:

i. Ka-hortagga;
ii. Baarista;
iii. Ogaanshaha;
iv. Dacwad-ku-oogista;
v. Garsooridda dembiyada;
vi. Fulinta ciqaabta dembiyada;
vii. Xakameynta iyo ka-hortagga xaaladaha caafimaadka guud ee dadweynaha; iyo
viii. Waxyaalaha Amniga qaranka lagama-maarmaanka u ah.

## CUTUBKA 2AAD
## MABAADI'DA LAGU MAAMULAYO ADEEGSIGA XOGTA

### Qodobka 4aad
### Sharci-ahaanshaha Adeegsiga Xogta Shakhsiga

1. Xog-dhawre iyo Xog-adeegsade kasta waa in uu xaqiijiyaa in xogta shakhsiga loo adeegsanayo ujeeddo sharciga waafaqsan. Adeegsiga xogta waa in aysan dhib u keenin qofka xogta leh.
2. Xog-dhawraha waa in uusan xogta shakhsiga adeegsan, ama uusan oggolaan in la adeegsado xogta shakhsiyadeed oo uu mas'uulka ka yahay, marka laga reebo asbaabaha ku xusan Qodobka 14aad (2) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

### Qodobka 5aad
### Adeegsi Dheeraad ah ee Xogta Shakhsiga

1. Haddii Xog-dhawruhu uu doonayo in uu u adeegsado xogta shakhsiga ujeeddo ka duwan tii markii hore loo ururiyey, waa in uu ku wargeliyaa ujeeddada cusub qofka xogta leh isagoo siinaya wixii xog dheeri ah ee la xiriira ujeeddada cusub.
2. Marka Xog-dhawraha uu doonayo in uu adeegsi dheeraad ah ku sameeyo xogta shakhsiga ee markii hore la ururiyey ujeeddo gaar ah, waa in uu tixgeliyo arrimaha soo socda:
    a. In uu jiro xiriir ka dhexeeya ujeeddada asalka ah iyo ujeeddada la soo jeediyey;
    b. In la qiimeeyo xaaladda iyo duruufihii markaa xogta lagu soo ururiyey;
    c. In la xaddido dabeecadda xogta shakhsiga ah;
    d. In la qiimeeyo saameynta adeesiga cusub uu ku yeelan karo qofka xogta leh; iyo
    e. In la xaqiijiyo in uu jiro nidaam ku habboon oo lagu ilaalin karo xogta shakhsiga ah.
3. Qofka xogta leh waa in la siiyaa xogta kor ku xusan, ka hor inta aan la sameyn adeegsi dheeraad ah iyadoo adeegsiga dheeraadka ah la sameyn karo haddii:
    a. Qofka xogta leh bixiyo oggolaanshaha adeegsiga dheeraadka ah;
    b. Adeegsiga dheeraadka ah loo sameynayo keliya sababo la xiriira cilmi-baaris, ama ujeeddooyin tiro-koob oo dan guud ah; iyo
    c. Adeegsiga dheeraadka ah oo lagama-maarmaanka u ah fulinta waajibaad sharci.

## Qodobka 6aad
## Oggolaanshaha Qofka Xogta Leh

1. Oggolaanshaha qofka xogta leh waxaa loola jeedaa fasax kasta oo xor ah, cayiman, ogaalna lagu sameeyey, kaasoo si aan mugdi ku jirin u cabbiraya rabitaanka qofka xogta leh, isagoo ku muujinaya hadal ama tallaabo cad oo caddeynaysa in uu bixiyey oggolaanshaha adeegsiga xogtiisa gaarka ah.
2. Xog-dhawraha waa in uu ku wargeliyaa qofka xogta leh:
   a. Cidda mas'uulka ka ah ururinta iyo adeegsiga xogta shakhsiga ah;
   b. Sababta iyo ujeeddooyinka loo ururinayo ama loo adeegsanayo xogta shakhsiga ah;
   c. Nooca xogta shakhsiga ah ee la ururinayo, lana adeegsanayo;
   d. Macluumaad ku saabsan isticmaalka xogta shakhsiyeed ee lagu fulinayo go'aan-qaadashada tooska ah ( Automatic decision-making), haddii ay khusayso;
   e. Khataraha suurta-galka ah ee ku saabsan wareejinta xogta, sabab maqnaanshaha go'aan ku filan ama tallaabooyin ku habboon oo ilaalinaya;
   f. Haddii xogtiisa lala wadaagayo dhinac saddexaad, iyo sababta loola wadaagayo;
   g. In uu qofku xaq u leeyahay in uu ka laaban karo oggolaanshaha uu hore bixiyey, marka laga reebo adeegsigii hore ee sharciga ahaa;
   h. Saameynta ay leedahay bixinta, diidmada, ama ka-noqoshada oggolaanshaha.
3. Xog-dhawraha waa in uu ugu sheegaa qofka xogta leh luqad uu fahmi karo oo ah; qoraal, af, iyo fariin maqal ama muuqaal ah, macluumaadka ku xusan faqradda 2[aad] ee qodobkan.
4. Xog-dhawruhu inta uusan oggolaanshiyo ka qaadin qofka xogta leh waa in uu hubiyaa:
   a. In qofka xogta leh uu awoodo in uu bixiyo oggolaansho (capacity to give consent) si wafaqsan qodobka 9 aad ee Xeer-nidaamiyahan.
   b. In oggolaanshuhu yahay mid qofku si xor ah u bixiyey; iyo
   c. In oggolaanshuhu yahay mid ku kooban ujeeddada loo isticmaalayo xogta.
5. Oggolaanshaha waxaa loo qaadanayaa in si xor ah loo bixiyey, marka laga reebo xaaladaha hoose:
   a. Marka oggolaanshaha la bixiyey iyadoo lagu saleynayo in qofka xogta leh uusan ka hor-imaan karin soo-jeedinta habka loo isticmaalayo xogtiisa;
   b. Haddii oggolaanshaha loo soo bandhigo sidii shuruud aan qayb-ahaan la beddeli karin oo ku lifaaqan habka loo isticmaalayo xogta;
   c. Marka qofka xogta leh uusan awoodin in uu diido ama ka laabto oggolaanshihiisa iyadoo aan wax dhibaato ah ka dhalan;
   d. Marka Xogdhawruhu isku daro dhawr ujeeddo oo xogta loo isticmaalayo, iyadoo aan si gaar ah loo helin oggolaansho u go'an ujeed kasta; iyo
   e. Marka ujeeddada qofka xogta leh ay tahay mid aan caddayn ama mugdi ku jiro.
6. Qofka xogta shakhsiga leh waa inuu bixiya oggolaanshiyo cad oo aan mugdi ku jirin sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, qaab-qoraal, saxiixid dokumenti, ama fal kasta oo muujinaya oggolaanshaha adeegsiga xogta gaarka ah.

## Qodobka 7aad
## Awood-bixinta Oggolaanshaha

Qofka waxaa loo qaadanayaa in uu leeyahay awood-bixin oggolaansho marka:

a. Qofka xogta leh uu gaaray da'ada 18 (siddeed iyo toban) sano;
b. Maskax ahaan uu fayo-qab yahay (Maankiisu dhammeystiran yahay). Qofka waxaa loo tixgelinayaa in uu maankiisu dhammeystiran yahay haddii dhakhtar idman uusan caddeyn sidaa wax ka duwan; iyo
c. Qofka aan lahayn awood sharci (incapacity) oggolaanshihiisa waxaa bixinaya wakiilkiisa sharci, marka laga reebo xaaladaha ku xusan Qodobka 16aad (6) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

## Qodobka 8aad
## Noocyada Oggolaanshaha

1. Oggolaanshaha la aqbalayo wuxuu noqon karaa:
    a. Oggolaansho cad: Qofka leh xogta wuxuu bixinayaa oggolaansho cad oo la dokumentiyeyn karo, sida calaamadeynta meesha loogu talo-galay, bixinta koodhadhka hubinta (OTP), bixinta xogta dhalyada ama muunadda faraha (finger-print), saxiixidda foom diyaarsan, ama diridda Email-ka; ama
    b. Oggolaanshaha xulashada ku dhisan: Qofka ma saameynayso illaa uu asagu ikhtiyaari ku doorto in lagu daro, ka dib aqbalaadiisa.Tusaalaha oggolaanshaha doorashada ku dhisan waa sida soo socota: "Waxaan rabaa in aan helo warsidaha (newsletter) XXX" - Haddii meesha loogu talo-galay laga tago iyadoo aan la calaamadeyn, laguuma soo diri karo warsidaha XXX."
2. Lama aqbalayo oggolaansho isku duuban, waa in oggolaasho loo helaa noocyada kala duwan ee adeegsiga xogta.

## Qodobka 9aad
## Adeegsiga Xogta Carruurta iyo Dadka aan Lahayn Awood Sharci

1. Marka laga hadlayo arrimaha Dhowrista xogta, carruur waxaa loola jeedaa qof kasta oo ka yar sideed iyo toban (18) sano. Haddii xog-dhawraha ama xog-adeegsaduhu uu isticmaalayo xogta carruurta, waa in uu oggolaanshiyo ka helaa walidka ama wakiilka sharci ee caruurta.
2. Oggalaanshaha adeegsiga xogta carruurta ka yar 18 (sideed iyo toban sano ama dadka aan la hayn awood sharci wuu aansaxaya haddii ay dan cad ugu jirto si waafaqsan Qodobka 16aad (6) ee Sharciga Dhowrista Xogta.

## Qodobka 10aad
## Oggolaanshaha Xog-qabteyaasha Bogagga (Cookies)

1. Adeegsiga xogta shakhsiga ee xog-qabteyaasha bogagga ku xiran Internet-ka wuxuu u baahan yahay oggolaansho haddi aysan ahayn kuwo lagama-maarmaan ah, waa in bogagga internet-ka ay si cad u muujiyaan cookies-ka, iyadoo isticmaalayaasha loo oggolaanayo inay si fudud u aqbalaan ama u diidaan.
2. Ka hor adeegsiga xogta shakhsiga ee bogagga internet-ka waa in qofka la ogeysiiyaa:
    a. Jiritaanka iyo ujeeddada xog-qabtaha;

    b. Xogta laga  ururinayo iyo waqtiga la haynayo;
    c. Cidda mas'uulka ka ah isticmaalka xogaha uu ururiyo xogqabtaha;
    d. Xog ku saabsan sida loola noqon karo oggolaanshaha; iyo
    e. Siyaasadda Dhowrista xogta ee Bogagga ku xiraninternet ka.
3. Hay'addu waxay xeer-nidamiye ka soo saaraysaa adeegsiga xogta shakhsiga ee danabeysan.

## Qodobka 11aad
## Qiimeynta Saameynta Dhowrista Xogta

1. Adeegsiga xogta marka ay u badantahay inay keento khataro ku wajahan xuquuqda iyo xoriyaadka dadka xogta leh, xog-dhawraha muhiimka ah waa inuu sameeyo qiimeyn ku saabsan saameynta Dhowrista xogta kahor inta uusan adeegsan si waafaqsan Qodobka 29aad (1) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
2. Ujeedka faqradda hore ee qodobkan, Adeegsiga xogta ee keeni kara halis sare oo lid ku ah xuquuqda iyo xorriyadda qofka xogta leh waxaa ka mid ah:
    a. Go'aan qaadasho si deg deg ah oo leh saameyn sharci ama mid la mid ah, taas oo ay ku jirto isticmaalka falanqayn muuqaal ama hab-algoritam, ama isticmaal xogta shakhsiyeed oo xasaasi ah;
    b. Isticmaalka xogta shakhsiyeed si ballaaran ujeeddo aan ahayn tii markii hore xogta loo ururiyey;
    c. Marka isbeddel ku yimaado qayb kasta oo ka mid ah adeegsiga xogta taas oo kordhin karta khatarta uu la kulmayo qofka xogta leh;
    d. Adeesiga xogta xasaasiga ah ama xogta carruurta iyo dadka nugul;
    e. Isku darka, isku xiridda, ama isbarbardhigga xogaha kala duwan ee laga helay ilo kala duwan iyo adeegsiga loo sameeyo ujeeddooyin kala duwan;
    f. Isticmaalka farsamooyin iyo Alado cusub oo tiknoolajiyeed ama xog-ururin; iyo
    g. Marka adeegsigu ka hor-istaagayo qofka xogta leh inuu isticmaalo xuquuqdiisa Dastuuriga ah.
3. Xaaladaha qiimeynta loo baahan yahay sida kuxusan faqradda 2[aad] ee Qodobkan, Xog-dhawraha wuxuu isticmaali karaa foomka ay Hay'adda Dhowrista Xogta soo saarto si loo sameeyo qiimeynta.
4. Sid waafaqsan qodobka 29 (2) ee Sharciga Dhowrista xogta , haddii Xog-dhawraha muhiimka ah laga rabo inuu la tashado Hay'adda Dhowrista Xogta  ka hor Adeegsiga xogta, wada tashigaas waa in lagu sameeyaa sodon (30) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda soo saarista warbixinta qiimeynta saameynta (Impact assisment).
5. Marka laga rabo xogdhawraha inuu la tashado Hay'adda Dhowrista Xogta Sida waafaqsan qodobka 29 (2) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, waa inuu soo gudbiyaa:
    a. Warbixinta qiimeynta saameynta Dhowrista xogta (Data Protection Impact Assessment) ee loo diyaariyey siwafaqsan qodobka 29 (4) (d) ee sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha; iyo
    b. Mas'uuliyadaha Xog-dhawraha ee la xiriirra adeegsiga xogta, marka ay ku habboon tahay.
6. Hay'adda Dhowrista Xogta waxey muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah qiimeyn

kusameyneysaa warbixinta losoo gudbiyey siwafaqsan faqradda 5aad ee qodobkan.

7. Hay'addu haddii u aragto in adeegsiga larabo uu lid ku yahay Shariciga Dhowrista Xogta Dadweynaha iyo Xeer-nidamiyahan waxay soo saareysaa talooyin qoraal ah si loo maareeyo khataraha imankara.

## Qodobka 12aad
## Ka-noqoshada Oggolaanshaha

1. Qofka xogta leh wuxuu xaq u leeyahay in uu ka noqon karo oggolaanshiyihii adeegsiga xogta uu hore u bixiye xilli kasta, si waafaqsan Qodobka 21aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
2. Ka noqoshada oggolaanshaha waxaa ka dhalanaya;
    a. Adeegsigii xogta oo joogsada;
    b. In la tirtiro xogtii la hayey;
    c. In la ogeysiiyo dhinac saddexaad ka noqoshada oggolaanshaha; iyo
    d. In dukumenti ahaan loo kaydiyo ka noqoshada oggolaanshaha.
3. Ka noqoshada oggolaanshaha adeegsiga xogta ee ku xusan qodobkan masaameyneyso xogaha lasiiyey Hay`addaha dawliga ah.

## Qodobka 13aad
## Ujeedka, Yareynta Iyo Saxnaanta Xogta

1. Xogta shakhsiga waa in loo aruuriyaa u jeedo cad, cayiman oo sharci ah lana jaan-qaadeysa u jeedadii loo ururiye, wax ka baxsan ne loo isticmaalin haddii sharciga si kle u sheegin.
    a. Sida ku xusan Qodobka 14 (4) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, waxaa loo qaadanayaa adeegsiga in uu la jaan-qaadaayo ujeeddadii loo ururiyey; iyo
    b. Marka lagu gaarayo dano la mid ah kuwii loo ururiyey xogta.
2. Xogta shakhsiga waa in laga ururiya inta ugu yar oo muhiimka ah ee lagama-maarmaanka ah.
3. Xogta shakhsiga laga qaadayo waa iney ahaataa mid saxan, hadday qaldantana la sixi karo ama cusbooneysin lagu sameeyn karo marka loo baahdo.

## Qodobka 14aad
## Muddada Keydinta Xogta

1. Haddii aan sharci ama heshiis gaar ah lagu sheegin muddada keydinta xogta waxay noqoneysaa 7 (todobo) sano.
2. Keydinta xogta mihiimka u ah danta qaranka oo ay hayaan xog-dhawreyaasha dawliga ah laguma dabaqayo faqradda 1aad ee qodobkan.

# CUTUBKA 3AAD
# NIDAAMKA U-HOGGAANSANAANTA IYO AMNIGA XOGTA

## Qodobka 15aad
## Waajibaadka Xog-dhawreyaasha Iyo Xog-adeegsadeyaasha

1. Dhammaan Xog-dhawreyaasha iyo xog-adeegsadeyasha gaarka ah iyo kuwa dawladeed waa

in ay ku soo bandhigaaan siyaasadahooda ilaalinta xogta muddo 3 (saddex) bilood gudahood ah, laga billaabo taariikhda uu dhaqan-galo xeer-nidaamiyahan si waafaqsan Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

2. Xog-dhawre iyo Xog-adeegsade kasta waa inuu magacabaa Sarkaal Dhowrista Xogta haddii;
    a. Uu yahay Xog-dhawre ama Xog-adeegsade Dawladeed marka laga reebo Hay'adaha dawladda ee aan sharcigan lagu dabaqeyn
    b. Uu si joogto ah u adeegsado xogta shakhsi ee xasaasiga ah ee lagu qeexay Qodobka 2aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha; iyo
    c. Hawlaha ugu muhiimsan ee Xog-dhawraha ama Xog-adeegsadaha uu ku lug leeyahay fulinta hawl-gallo, kuwaas oo sababo la xiriira dabeecaddooda, baaxadooda iyo ujeedadooda, u baahan kormeer baaxad leh, nidaamsan (systematic) oo joogto ah, kuna saabsan dadka xogta leh.
3. Xog-dhawreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha waa inay sameeyaan baaritaaan faahfaahsan oo ku saabsan hab-dhaqanka ilaalinta iyo sir-ahaanshaha xogta muddo 6 (lix) bilood gudahood ah, laga billaabo markuu dhaqan-galo Xeer-nidaamiyahan, baaritaan kasta waa in lagu caddeeyo qodobbada soo socda:
    a. Macluumaadka shakhsiyeed ee la aqoonsan karo ee xog-dhawruhu hayo, oo ay ku jiraan xogta shaqaalaha iyo xogta shakhsi ee dadweynaha;
    b. Ujeeddada loo ururiyo macluumaadka shakhsiyeed;
    c. Ogeysiiska la siiyo shakhsiyaadka ee ku saabsan ururinta iyo adeegsiga macluumaadkooda shakhsiyeed;
    d. Fursadaha la siiyo shakhsiyaadka si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan, wax uga beddelaan, saxaan, dheeraad ku daraan, ama tirtiraan macluumaadkooda shakhsiyeed;
    e. Oggolaanshaha laga helo shakhsiyaadka ka hor inta aan laga ururin, la adeegsan, la wareejin, ama la shaacin macluumaadkooda shakhsiyeed, iyo hababka loo adeegsaday oggolaanshahaas;
    f. Siyaasadaha iyo hab-dhaqanka xog-dhawraha ee ku saabsan ilaalinta amniga macluumaadka shakhsiyeed ee la aqoonsan karo;
    g. Siyaasadaha iyo hab-dhaqanka xog-dhawraha ee isticmaalka saxda ah ee macluumaadka shakhsiyeed;
    h. Siyaasadaha iyo nidaamyada xog-dhawraha ee la xiriira ilaalinta xogta iyo sirta;
    i. Siyaasadaha iyo nidaamyada xogdhawraha ee daba-galka iyo soo-gudbinta xad-gudubyada la xiriira xogta iyo sirta; iyo
    j. Nidaamyada xog-dhawraha ee lagu qiimeynayo saameynta tiknoolajiyadda ku leedahay siyaasadaha amniga iyo sirta ee la dejiyey.
4. Xog-dhawrayaasha iyo Xog-adeegsayasha waa inay soo gudbiyaan nuqul kamida baarista iyo daba-gal ka lagu sameeyey siwafaqsan faqradda 3[aad] ee qodobkan, haddii
    a. Xogdhawraha ama Xog-adeegsadaha adeegsado xogta Shakhsiyeed ee xasaasiga ah
    b. Xog-dhawruha ama Xog-adeegsadaha adeegsado xog dad ka badan 1,000 lix bilood gudahood, Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha sanad kasta waa iney hay'adda Dhowrista Xogta u soo gudbiyaan warbixinta baarista marka ay adeegsadaan xog dad ka badan 2,000.
5. Xog-dhawreyaaasha iyo Xog-adeegsadayasha muhiimka ah waa inay iska diwaan-geliyaan

Hay'adda Dhowrista xogta muddo lix bilood gudahood, ayagoo raacaya Xeer-nidaamiyaahan iyo Sharciga Dhowrista xogta Dadweynaha.

## Qodobka 16aad
## Sarkaalka Dhowrista Xogta

Sarkaalka Dhowrista xogta ee lagu magacaabay si waafaqsan faqradda (2) ee qodobka 15aad ee Xeer-nidaamiyan, wuxuu yeelanayaa hawlaha soo socda:

a. In uu hubiyo in Xog-dhawrahu raacayo shuruucda, siyaasadaha, iyo awaamiirta ilaalinta xogta;
b. Bixinta talooyin ku saabsan habka ugu wanaagsan ee ilaalinta xogta;
c. Maamulka iyo daba-galka hawlaha adeegsiga xogta si looga hortago jabsashada xogta;
d. U fidinta shaqaalaha tababarro iyo wacyigelin ku saabsan ilaalinta xogta;
e. Isku xirka Hay'adda Dhowrista xogta, Xog-dhawraha iyo shakhsiyaadka Xogta leh si loo xalliyo cabashooyinka la xiriira xogta;
f. Aqoonsiga, maareynta iyo yareynta khataraha la xiriira ilaalinta xogta; iyo
g. Hubinta in la hayo diiwaanno sax ah oo ku saabsan adeegsiga xogta.

## Qodobka 17aad
## Diiwaan-gelin

1. Hay'adda Dhowrista xogtu waxay diiwaan-gelineysa dhammaan Xog-dhawreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha marka ay soo gudbibiyaan:
   a. Rukhsadda ama oggolaanshiyaha kale u haysto shaqadiisa;
   b. Magaca iyo cinwaanka Xog-dhawraha; sidoo kale magaca iyo macluumaadka xiriirka ee mas'uulkiisa ilaalinta xogta (Sarkaalka Xog-Dhowrista);
   c. Sharraxaad ku saabsan nooca xogta shakhsiga ah ee ka dhigaysa Xog-dhawre;
   d. In ay caddahay qaybaha iyo tirada guud ee ay yihiin dadka xogta shakhsiyeed la xirirto;
   e. Ujeeddooyinka uu ka lee yahay xogta shakhsiga ah ama uu u adeegsado;
   f. In uu sheego qaybaha xog-qaatayaasha uu la wadaago ama la wadaagayo xogta shakhsiga ah;
   g. Hay'ad kasta oo caalami ah ama dal kasta oo ka baxsan JFS, oo uu xogta shakhsiga ah u gudbiyey ama uu doonayo in uu u gudbiyo; iyo
   h. Sharraxaad guud oo ku aaddan khataraha, ilaalinta iyo tallaabooyinka amniga iyo hababka uu ku xaqiijiyo Dhowrista xogta shakhsiga ah.
2. Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha soo gudbiya maclumaadka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waa inuu buuxiyaa Foomka diiwaan-gelinta ee Hay'adda.
3. Xog-dhawre iyo Xog-adeegsade kasta ee soo buuxiya sharuudaha diiwaan-gelinta waxaa lagu qorayaa diiwaanka, wuxuuna yeelanayaa tirsi aqooneyd ugu qormaya Diiwaanka Hay'adda Dhowrista Xogta.
4. Xog-dhawraha ama Xog-adeegsadaha aan soo buuxin shuruudaha Diiwaan-gelinta ee sharcigu u dajiyey lama diiwaan-gelinayo. diidma kasta uu soo saaro madaxa diiwaan-gelinta waxaa lagu wargalinayaa codsadaha, waxayna noqonaysaa mid qoraal ah oo lagu caddeynayo sababta diidmada, waxaa cabasho looga qaadan Maareeyaha Guud ee Hay'adda. haddii uu

ku qanci waayo go'aanka Maareeyaha Guud waxuu rafcaan u qaadan karaa wuxuu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda awoodda u leh.

5. Xog-dhawraha muhiimka ee dawladeed wuxuu diiwaanka gelaya sharuud la`aan, hay`addaha ama shirkada gaar loo leeyahay oo ay qeybta ka tahay dawladda, waxaa la marsiinayaa hannaanka kuwa gaarka loo leeyahay ay maraan haddii saamiga dawladda uu ka yar yahay 51%.
6. Hay'adda Dhawrist xgta waxay diiwangalineysaa Sarkaalka Dhowrista xogta ee ay magacaabeen Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha, iyo shirkadaha Baarista iyo Daba-galka (Data protection Compliance Audit), waxaana laga soo saarayaa xeer- nidaamiyeyaal u gaar ah.

## Qodobka 18aad
## Khidmado

1. Cid kasta oo laga rabo in ay iska diiwaan-geliso Hay'adda Dhowrista Xogta, si waafaqsan Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha waxaa waajib ku ah in ay bixiso khidmadaha diiwaan-gelinta ee hay'addu jaan-goyso.
2. Xog-dhawreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha dawladeed kuma waajibayso in ay bixiyaan khidmadda is-diiwaan-gelinta, si waafaqsan Qodobka 33aad (3) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
3. Khidmadaha iyo arrimaha kawaajibaya waxaa loo raacayaa sida lagu caddeeyay lifaaqa (Annex) xeer-nidaamiyehaan.

## Qodobka 19aad
## Rukhsadda Dhowrista Xogta

1. Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadeyasha buuxiya shuruudaha diiwaan-gelinta lagu xusay Qodobka 17aad ee Xeer-nidaamiyahan iyo waajibaadka kale ee sharcigu saaray, wuxuu xaq u yeelanayaa in uu helo Rukhsadda Dhowrista Xogta.
2. Hay'adda Dhowrista Xogta waxay bixineysaa Rukhsadda Dhowrista Xogta ka dib marka ay qiimeyn ku sameyso u-hoggaansananta Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha ee Sharciga Dhowrista Xogta.
3. Sarkaalka Dhowrista Xogta iyo Shirkadaha Baarista iyo Daba-galka (Data Protection compliance Audit) ee soo buuxiya shuruudaha iyo wajibaadka lagu soo saaro xeer- nidaamiye u gaar ah waxaa la siinayaa Rukhsadda Dhowrista xogta (Data Protection Certified).
4. Rukhsadda Dhowrista Xogta waxay ku dhacaysaa muddo ku siman 1 (hal) sano.
5. Xog-dhawraha muhiimka ah waa in uu cusboneysiyaa rukhsaddiisa 15 (shan iyo toban) maalin ka hor muddada dhicitaanka.

## Qodobka 20aad
## Kala-noqoshada Iyo Laalidda Rukhsadda

Hay`adda Dhawritsa Xogta waxay awood u leedahay in ay kala noqoto ama laasho rukhsadda, Xog-dhawraha, Xog-adeegasadaha, Shirkadaha Baarista iyo Daba-galka (Data Protection compliance Audit) iyo Sarkaalka Dhowrista Xogta ee ku xad-gudba Sharciga Hay'adda, Xeer-

nidaamiyihiisa iyo hab-raacyada kale ee ay hay'addu soo saarto.

## Qodobka 21aad
## Daba-galka Dhawrsanaanta Xogta (Compliance audit)

1. Daba-galka dhawrsanaanta xogta waa daba-gal xirfadeed oo madax-bannaan laguna sameynayo Sanad kasta diiwaannada (keydka), Nidaamyada (Systems), Hawl-fuliyeyaasha (Applications) nidaamyada, Shabakadaha, Siyaasadaha iyo hab-raacyada xog- dhawreyaasha iyo xog-adeegsadeyaasha, si loo hubiyo u-hoggaansanaanta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, Xeer-nidaamiyeyaashiisa, iyo siyaasadaha Dhowrista xogta ee hay'addu soo saarto.
2. Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha waxay awood u leedahay in ay soo saarto go'aanno ku saabsan:
    a. Sameynta daba-gal qorsheysan;
    b. Soo-gudbinta warbixinnada baarista gudaha ah ee uu sameeyo Sarkaalka Dhowrista Xogta; iyo
    c. Sameynta baaritaanno goobeed ama baaris gaar ah oo lagu hubinaayo u-hoggaansanaanta ama jabsashada xogta.
3. Daba-galka Dhowrista xogta waxaa loo sameynayaa sababo ay ka mid yihiin:
    a. Qiimeynta heerka u-hoggaansanaanta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha iyo Xeer-nidaamiyeyaashiisa;
    b. Qiimeynta u-hoggaansanaanta siyaasadda Dhowrista xogta ee gudaha;
    c. Ka jawaabista cabashooyinka ay Hay'adda u soo gudbiyaan dadka xogta leh
    d. Ogaanshaha daldaloollada iyo habacsanaanta ka jirta nidaamka ay Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha isticmalaan; iyo
    e. Bixinta tilmaamaha lagama-maarmaanka ah iyo tallaabooyinka lagu xallinayo daldaloollada la ogaaday.
4. Daba-galka Dhowrista xogta ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, hay'addu waxay u wakiilan kartaa dhinac seddaxaad, si waafaqsan Sharciga Dhowrista Xogta iyo shuruucda kale ee dalka.
5. Hay'addu waxay Xeer-nidaamiye gaar ah ka soo saareysaa hannaanka daba-galka Dhowrista xogta.

## Qodobka 22aad
## Jabsashada Xogta

1. Xogdhawreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha waa in ay ku soo wargeliyaan Hay'adda Dhowrista Xogta 72 saacadood gudahood, laga billaabo marka ay ogaadaan jabsashada xogta, haddii ay jirto dib u dhac, waa in sababaha dib u dhaca lagu soo lifaqaa ogeysiis
2. Ogeysiiska jabsashada ee faqradda hore waa in lagu sheegaa:
    a. Nooca jabsashada sida; adeegsi aan la fasixin, lumid iyo xadid xog;
    b. Xogta shakhsi ee la jabsaday sida; xog maaliyadeed ama xog caafimaad;
    c. Magaca iyo xiriirka (contacts) Sarkaalka Dhowrista Xogta;
    d. Tirada dadka ay saameysay iyo diiwaannada xogta la jabsaday;

   e. Saameynta jabsashada xogtu ku yeelatay shakhsiyaadka xogta leh;
   f. Tallaabooyinka la qaaday ama la qorsheeyey si loo xakameeyo dhibaatada ama loo yareeyo waxyeellada;
   g. Goorta ay dhacday jabsashada, qaabka loo ogaaday, iyo waxa sababay; iyo
   h. Caddeyn haddii la wargeliyey shakhsiyaadka xogtooda la jabsaday ama sababta haddii aan la wargelin.
3. Xog-dhawre ama Xog-adeegsade kasta waa in uu diiwaan-geliyaa xogta shakhsiga ee la jabsaday iyo xaqiiqooyinka la xariira jabsashadaas, si waafaqsan Qodobka 27aad ee Sharciga Dhowrista Xogta.
4. Hay'adda Dhowrista Xogta marka ay soo gaarto wargelin la xariirta jabsashada xogta waxay qaadaysaa tallaabooyin baaritaan oo waafaqsan xeer-nidaamiyahan iyo hab-raacdayada kale ee khuseeya.

### Qodobka 23aad
### Wacyi-gelinta Joogtada ah ee Dadweynaha

Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha waxay keligeed ama iyadoo la kaashanaysa Ururrada Bulshada Rayidka ah, ama cid kasta oo fududeyn karta, soo abaabuleysaa siminaarro, aqoon-is-weydaarsiyo, shirar, iyo barnaamijyada lagu wacyi-gelinayo bulshada, laguna xoojinayo u-hoggaansanaanta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, Xeer-nidaamiyihiisa, Hageyaalsha iyo Hab-raacyadiisa kale ee khuseeya.

## CUTUBKA 4AAD
## WAREEJINTA XOGTA

### Qodobka 24aad
### U-wareejin Xogta meel ka baxsan Dalka

1. Xog-dhawraha waxaa u bannaan in uu u wareejiyo xogta shakhsiga meel ka baxsan Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, marka la helo shuruudaha Sharciga Dhowrista Xogta u dejiyey wareejinta, si waafaqsan Qodobka 30aad ee Sharciga Dhowrista Xogta, haddii ay jiraan:
   a. Tallaabooyin ku habboon oo lagu ilaalinayo xogta;
   b. Go'aan ku saabsan jiritaanka ilaalin ku habboon xogta oo ay gaartay Hay'adda Dhowrista Xogta;
   c. Wareejinta oo loo arko mid lama-huraan ah; ama
   d. Oggolaanshaha laga helo qofka xogta leh.
2. Wareejinta xogta shakhsiga meel ka baxsan Jumuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa loo qaadanayaa in ay jiraan tallaabooyin ilaalineed oo ku haboon marka laga helo xaaladaha lagu sheegay Qodobka 30aad (2) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
3. Marka wareejinta xogta u dhacdo si waafaqsan farqooyinka sare ee qodobkan waa in:
   a. Wareejinta xogta la diiwaan-geliyo;
   b. Diiwaan-gelinta loo soo gudbiyaa Hay'adda Dhowrista xogta marka ay dalbato; iyo
   c. Diiwaan-gelinta waa in laga helaa:

i. Taariikhda iyo waqtiga wareejinta;
ii. Magaca qofka ama hay'adda xogta loo dirayo;
iii. Asbaabta lagu saleynayo wareejinta; iyo
iv. Faahfaahin ku saabsan xogta shakhsiga ah ee la wareejiyey.

### Qodobka 25aad
### Wareejin Xogta marka aysan jirin Ilaalin Ku habboon

Haddii aan la helin shuruudaha ku xusan godobka 30 (1) ee Sharciga Dhowrista Xogta, xog-dhawraha wuxuu u wareejin karaa xogta shakhsiga ah dal ka baxsan JFS ama urur caalami ah, si waafaqsan Qodobka 31aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, haddii:

a. Qofka xogta leh uu sii cad u bixiyo oggolaanshaha wareejinta xogtiisa shakhsi, ka dib markii lagu wargeliyey khataraha ka dhalan kara wareejinta xogtiisa;
b. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay fulinta heshiis ka dhexeeya qofka xogta leh iyo xog-dhawraha, ama tallaabooyin lagu hirgelinayo heshhiis hore markuu codsaday qofka xogta leh;
c. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay gelidda ama fulinta heshiis ay dan ugu jirto qofka xogta leh, oo u dhaxeeya xog-dhawraha iyo dhinac saddexaad;
d. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay danta guud;
e. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay dejinta, fulinta, ama difaaca dacwadaha sharciyeed; iyo
f. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay ilaalinta danaha muhiimka ah ee qofka xogta leh, aysanna suuragaleyn in uu bixiyo oggolaanshiyo iyadoo la rumeysan yahay in uu bixin lahaa oggolaanshiyaha haddii lagu wargeliyo.

## CUTUBKA 5AAD
## FULIN

### Qodobka 26aad
### Cabashooyin

1. Qofka xogta leh ee waxyeello ku soo gaarto falka ama fal-la'aanta Xog-dhawraha ama Xog-adeegsaha, ee ka dhalatay xad-gudub ka dhan ah xaquuqda dastuuriga ah ee la xariirta xogta shakhsiga, Sharciga Dhowrista Xogta, Xeer-nidaamiyahan iyo hab-raacyada kale ee ay hay'addu soo saarto, wuxuu cabasho u soo gudbisan karaa Hay'adda Dhowrista Xogta, si waafaqsan faqradda (2) ee Qodobkan.
2. Hay'addu waxay qabaneysaa cabashooyinka loo soo gudbiyey marka laga helo shuruudaha hoose:
    a. Magaca iyo cinwaanka laga heli karo dhinaca laga cabanayo;
    b. In ay xaddidan tahay dulucda mowduuca ay cabashadu la xiriirto;
    c. In cabtuhu dan ka leeyahay mowduuca ay cabashadu la xiriirto;
    d. In cabashada lagu soo gudbiyey muddo soddon bari (30) gudaheed, laga billaabo markii la ogaaday xad-gudubka cabashadu la xiriirto. Haddi uu kadib dhaco mudadaas waa

inuu soo gudbiyaa asbab maan gal ah; iyo

   e. Faahafahin kooban oo ku saabsan falka xad-gudubka ah, saameynta ka dhalatay iyo codsiga cabtaha.

3. Qofka xogta leh inta uusan cabashadiisa u soo gudbin Hay'adda Dhowrista Xogta, waa in uu xalka la kaashadaa Xog-dhawraha ama Xog-adeegsadaha, haddii aysan jirin baahi degdeg ah, ama waxyeello khatar leh.

## Qodobka 27aad
## Baarista Cabashooyinka Iyo Jabsashada Xogta

1. Hay'addu waxay billaabi kartaa baaris ku saabsan cabashada loo soo gudbiyey, si waafaqsan Qodobka 26aad ee Xeer-nidaamiyahan, ama si iskeeda ah marka ay jirto asbaab maangal ah oo tilmaameysa in Xog-dhawruhu uu ku xad-gudbay ama ay u
2. badan tahay in uu ku xad-gudbo Sharcigan; xeer-maamul; xeer-hoosaad ama amarro lagu soo saaray sharcigan.
3. Waaxda Baarista iyo Daba-galka ee hay'adda, waxay mas'uul ka tahay baarista iyo daba-galka u-hoggaansananta ee lagu xusay Qodobka 21aad ee Xeer-nidamiyahan.
4. Sarkaalka loo xil saaray baaris gaara ee ka tirsan Waaxda Baarista iyo Daba-galka, ee gudanayo shaqadiisa, marka uu oggolaansho ka helo Maareeyaha wuxuu dalban karaa:
   a. In uu qofku yimaado Xarunta Shaqada ee Hay'adda wagti cayiman, si wax looga waydiiyo arrin ku saabsan cabashada;
   b. In la keeno bayaan qoraal ah oo lagu sameeyey dhaar, ama xaqiijin tibaaxeysa dhammaan macluumaadka loo baahan karo si waafaqsan amarka;
   c. gofka in uu soo saaro ama oggolaado in la galo qalabka qaab la arki karo, oo u habeysan luqad la fahmi karo iyo format la akhrin karo, marka sheyga baaristu la xiriirto ay ku jirto macluumaad lagu keydiyey qalab makaanik ama elegtaroonig ah; iyo
   d. In la keeno dukumintiga, diiwaanka ama qoraalka looga baahan karo arrin kasta oo baarista la xiriirta, kaas oo aan qofka ka hor-istaageyn sharci kale in uu shaaciyo.
5. Sarkaalka u xilsaaran waa in uu baaristiisa ku soo gabagabeeyaa muddo 45 maalin gudahooda, oo ka billaabaneysa marki ay cabashadu soo gaartay
6. Haddii baaristiisa lagu ogaado dhicitaanka fal-dambiyeed ka mid ah kuwa qaranku oogo, waa in lagu wargeliyaa Booliska, si waafaqsan Qodobka 18aad ee Sharciga Habka Ciqaabta Somaliyeed.
7. Natiijada Baarista la sameeyey si wafaqsan qodobkan waa in loo gudbiyaa Maareeyaha.

## Qodobka 28aad
## Maareeyaha Guud ee Hay'adda

1. Iyadoo aan wax loo dhimin xaqa qofka ee ah in uu ka dacwoodo Maxkamadda awoodda u leh, Maareeyaha Guud wuxuu u xilsaaran yahay hawlaha soo socda:
   a. Soo-saaridda amarro maamul, si loo ilaaliyo mawduuca lagu xad-gudbay inta lagu guda jiray baaritaanka;
   b. U-yeeridda cid kasta oo eedaymo loo soo jeediyey si ay uga jawaabto eedahaas muddo 7 (toddobo) maalmood gudahood ah;

c. Qiimeynta natiijada baarista ee loo soo gudbiyey, si waafaqsan Qodobka 27aad (6) ee xeer-nidaamiyahan;
d. Wuxuu farayaa Xog-dhawre in uu joojiyo ama uu qaado, tallaabooyin uu uga joojinayo Xog-adeegsade isticmaalka xogta, inta laga hubinayo u-hoggaansanaantiisa Sharciga Dhowrista Xogta;
e. Soo saarista amar lagu farayo Xog-dhawre in uu mag-dhow siiyo qofka xogta leh ee ay gaartay dhibaatada, khasaaraha ama dhaawaca ka dhashay xad-gudubka;
f. Qiimeynta iyo jaangoynta mag-dhowga uu bixinayo Xog-dhawraha ee lagu sheegay Qodobka 37aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha; iyo
g. Soo-saarista ganaaxyada maamul ee ka dhasha u-hoggaansanaan-la'aanta sharciga, si waafaqsan Qodobbada 37aad iyo 38aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

2. Go'aannada Maareeyaha waxaa rafcaan looga qaadan karaa Maxkamdda awoodda u leh.

### Qodobka 29aad

Soo-saarista hageyaal, jiheeyaal iyo habraacyo

**Hay'adda Dhowrista Xogta waxay soo saraysaa Hab-raacyo** iyo **Hageyaal lagu** hirgelinayo **mowduucyo gaar ah si loo dhaqan-geliyo Sharciga Dhowrista Xogta** iyo Xeer-nidaamiyahaan, **waxaana lagu soo saarayaa arrimaha ay ka mid ka yihiin: Dhowrista Xogta Cafimaadka, Waxbarashada, Isgaarsiinta, Bankiyada iyo Xogaha kale ee Hay'addu u aragto in ay muhiimad gaar ah leeyihiin.**

### Qodobka 30aad
### Adeegsiga Shuruucda Caalamiga Ah

Wixii laga waayo Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha iyo Xeer-nidaamiyehaan ee khuseeya qodob muhiim ah oo lagu dhawrayo xogta Shakhsiga waxaa loo raacayaaa xeerarka kale ee dalka iyo heshiisyada caalamiga ah oo ay qeybta ka tahay Soomaaliya.

### Qodobka 31aad
### Wax-ka-beddel iyo Dhaqan-gal

1. Hay`adda Dhowrista xogta iyadoo tixgelinaysa dib-u-habeynta sharciyada iyo siyaasadaheeda waxay wax-ka-beddel xilli kasta ku sameyn kartaa xeer-nidaamiyahan, una gudbineysa Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolojiyadda, Xukuumadda JFS.

2. Xeer-nidaamiyehan wuxuu dhaqan-gelayaa markuu meel-mariyo Golaha Wasiirada, Xukuumadda JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**LIFAAQA 1AAD**

KHIDMADAHA DIIWAANGALINTA

Xog-dhowre iyo Xog-adeegsade kasta si loo diiwaangaliyo waa inuu bixiyaa **Khidmadda Diiwaangalinta** si waafaqsan **Qodobka 33 ee Sharciga Dhowrista Xogta.** Khidmadaha waxay noqonayaan sida soo socota:

| **Nooca (Size)** | **Faahfaahin (Description)** | **Khidmadda (Fees)** |
|---|---|---|
| **Yar (Small)** | Xog-dhowreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha leh shaqaale u dhexeeya **1–50**, dakhliga sanadlaha ugu badnaan yahay **$40,000**, adeegsada xogta shaqsiga dad gaaraya 200 oo Qofood muddo 6 bilood gudahood | **$350** |
| **Dhexdhexaad (Medium)** | Xog-dhowreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha leh shaqaale u dhexeeya **51–99**, dakhliga sanadlaha u dhexeeya **$40,001 – $386,996.90**, adeegsada xogta shaqsiga dad u dhaxeeya 201 - 1000 oo Qofood muddo 6 bilood gudahood | **$1,050** |
| **Weyn (Large & Enterprise)** | Xog-dhowreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha leh shaqaale ka badan **99**, dakhliga sanadlaha ka badanyahay **$386,996.90**, adeegsada xogta shaqsiga dad ka badan 1000 oo Qofood muddo 6 bilood gudahood | **$2,500** |
| **Hay'adaha Dowladda (Public institutions)** | Waxaa looga jeedaa **Xog-dhowreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha dowladeed** kuwaas oo **uruuriya ama adeegsada xogta shaqsiga** sida: Wasaaradaha, wakaaladaha, hay'adaha adeegyada dadweynaha iyo dawladda hoose | **Waa ka reebantahay khidmadda** |